

Farriintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaan si dhakhso ah loo soo gelin doonta iyada oo ah Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 14, 2021-ka

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha Guryaha Koox ahaanta Loo degan yahay ee ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Taageerada shaqaale yaraanta ee loogu talagalay guryaha koox ahaanta loo degan yahay

Iyada oo qayb ka ah dadaalada guud ee lagu xaqiijinayo in dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ay si ammaan ah ugu sugnaan karaan guryahooda hadda inta arrimaha dhanka shaqaaluhu ay weli yihiin caqabad, Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon (ODHS) ayaa bilawday qandaraas ay la leedahay shirkad shaqaaleysiisa shaqaalaha daryeelka caafimaadka si loo keeno shaqaale taageera goobaha la degan yahay 24-saacadood.

ODDS waxay adeegsanaysaa xogta ra'yi ururinta oo ay bixiyeen daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay (Waad ku mahadsan tihiin kuwa buuxiyay ra'yi ururinta!) si loo ogaado guryaha u baahan waxaana mudnaanta la siinayaa iyadoo lagu saleynayo waqtiga jawaabta ra'yi ururinta, darnaanshaha baahida iyo tirada shaqaalaha ee uu heli karo qandaraaslaha degaankaasi.

ODDS ayaa wici doonta hay'adaha daryeelka bixiya ee u baahan shaqaale si ay u ururiyaan macluumaad dheeraad ah. Marka shaqaale la heli karo oo loo qoondeeyo guri, ODDS waxay bilaabi doontaa qandaraas ay la leedahay daryeel bixiyaha wax helaya. Qandaraasyadani:

- Marka hore waa 30 maalmood, iyaga oo leh kala doorashada ah in la kodhiyo oo la gaarsiiyo 30 maalmood oo dheeraad ah marka la codsado.
- Wuxuu waqtigoodu dhici doonaa oo ku egyihiin Diisambar 31, 2021.
- Waxaa la iskaga baahan yahay copay dhan \$25 shaqaalihiiba oo ah taageero loogu talagalay 30 maalmood ee u horreeya. Heerka saacadaha shaqaaluhu ayaa kordhi doona haddii waqti dheeraad ah la codsado lana oggolaado. Copay-ga waxaa loo isticmaali doonaa si uu gacan uga geyso bixinta/daboolida qandaraaska shaqaalaha wuxuuna xaqiijin doonaa in aanu u hoggaansamayno xeerarka Medicaid.
- Waxay daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay uga baahan yihiin in ay tababaraan shaqaalaha qandaraaska la siiyay si ay uga shaqeeyaan guryahooda.
- Waxay daryeel bixiyayaasha uga baahan yihiin in ay raacaan [Tilmaamaha Dib u furitaanka](#) ee ODDS ee hadda jira.

Ka hor inta aan la helin taageero, daryeel bixiyayaashu waa in ay saxiixaan warqad heshiis. Tusaalaha warqada waxaa laga haleyaa [internet-ka](#).

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook [@oregonDHS.IDD](#) ama twitter [@OregonODDS](#) oo wax ka ogow [website-keena](#).

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.